

KU DHAQAN XAFIIS D.



# Faafin Rasmii ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sanadka 1

Muqdisho, Tr. 20 Dicember 1973

Lam. 26

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudebedeeds — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay waxuu ka bilahmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiska Canshuraha ee Wasaarii da lacagta

## KOBNIIN BOGGA KOOWAAD SHARCI

SHARCI L. 19 Tr. 9 Dicembre 1973 — Sharci ku saabsan caga/cagafta iyo wixii la xidhiidha (Tractors and Alkied Machinery) oo ay wakaladda cagaftu (ONAT) u celiso wakaladda guntada deg degga ah.

Bog. 481

SHARCI L. 20 Tr. 9 Dicembre 1973 — Toosin sharciga tiriadiisu tahay 54 ee soo baxay 10kii Sebtember 1970.

» 482

## BOGGA LABAAD XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KA-CAAANKA, Tr. 5 Dicembre 1973, L. 119 — Nidaaminta waqafyada.

» 483

XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KA-CAAANKA, Tr. 8 Dicembre 1973, L. 120 — Isbaddalkii Shanaad ee Miisaaniyadda Sannadkan 1973 (5th Virement of 1973 Budget).

» 487

XEER WASAARADDA ARRIMAHAD GUDAHA, Tr. 9 Dicembre 1973, L. 121 — <i>Magacaawgii Idaarada Gud-diga Kacaanka Degmada Sheekh Qaybtiiisa Wakillada Beesha.</i>	Bog. 489
XEER WASAARADDA GENACSIGA GUDAHA, Tr. 1 Dicembre 1973, L. 122 — <i>Oiimaha Alaabta Lagama Maarmaanka ah.</i>	» 491
XEER TALIYAHAD BANCA NAZIONALE SOMALA, Tr. 18 Settembre 1973, L. 123 — <i>Xeerka Sarriifka Lacagaha Qalaad.</i>	» 493
XEER TALIYAHAD BANCA NAZIONALE SOMALA, Tr. 26 Novembre 1973, L. 124 — <i>Xeerka Sarriifka Lacagaha Qalaad.</i>	» 495

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Cali Jaamac Biixi.</i> (219)	Bog. 496
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Muuse Ciise Moxamed.</i> (220)	» 497
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Moxamed Cali Nur (Dacar).</i> (221)	» 497
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Cabdullahi Xasan Foodey.</i> (222)	» 498
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Moxamed Nur Guutale.</i> (223)	» 498
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Moxamed Nur Guutale.</i> (224)	» 499
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Cabdulqaadir Moxamed Nur Guutale.</i> (225)	» 499
MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Ogeysiis Dhumid Buugga L. 1655 — <i>Moxamed Weyrax Moxamed.</i> (226)	» 500
MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Ogeysiis Dhumid Buugga L. 3307 — <i>Warsame Aden Moxamed.</i> (227)	» 500
MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis Dhumid Buugga L. 4743 — <i>Moxamed Samatar Farax.</i> (228)	» 501
MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis Dhumid Buugga L. 9510 — <i>Cabdullahi Yasin Cusman.</i> (229)	» 501

## BOOGA KOOWAAD SHARCIYO

SHARCI L. 19, Tr. 19 Dicembre 1973.

Sharci ku saabsan Cagafcagafta iyo wixii la xidhiidha (Tractors and other Allied Machinery) oo ay wakaladda cagaftu (ONAT) u celiso wakaaladda cuntada deg degga ah.

### GUDDOONSHAHAA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu 64 ee 21kii Oktoober 1972, kuna saabsanaa Wakaladda Cuntada Deg Degga ah (Agricultural Crash Programme Agency);

ISAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 11 ee 15kii Gennaio 1973 kuna saabsanaa Wakaaladda Gagafta iyo Alaabta Beeraha (ONAT);

ISAGOO TIX GELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda ee 15kii Nofambar 1973;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qoddob Keliya

**15/11/1973**

Marka laga bilaabo 15kii 1973 Wakaaladda Cuntada Deg Degga ah (Agricultural Crash Programme Agency), hadda iyo wixii ka dabeeya, si madax banaan ayay u maamulan doontaa Qalabka Beeraha lagu qodo — Cagafcakafda iyo wixii la xidhiidha (Tractors and other Allied Machinery).

2. Wakaaladda Cagafta iyo Alaabta Beeraha (ONAT), waxaa ay u celin doontaa Wakaaladda Cuntada Deg Degga ah alaabti hore ay u lahaan jirtay ayana la soo wareegtay ONAT.

Muqdisho, 9 Dicembre 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*  
DUDDOONSHAHAA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 20, Tr. 9 Dicembre 1973.

Toosin sharciga tiradiisu tahay 54 ee soo baxay 10kii Sebtember 1970.

GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIX GELINAAYA Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka ee 19kii Oktoober 1973;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Qodobka 13aad ee Sharciga tiradiisu tahay 54 ee 10kii September 1970 waxaa loo fidiyey Ciidammada Qalabka Sida.

2. Marka dembiyada ku qoran Qodobkan lagu qaadaayo dad ka trsan Ciidammada Qalabka Sida ~~X~~ Dawladdu (Prosecutor) waxaa uu noqon doona nin ka mid ah Ciidammada Qalabka Sida.

Qodobka 2aad

Wixii dacwooyin ah ee ku saabsan booli qaran (Peculation) ee yaal (Pending) Maxkamadda Ciidammada Qalabka Sida, waxaa loo wareejiyey Maxkamadda Badbaadada Unimadda.

Qodobka 3aad

Qoddobada 186 ilo 189 ee Sharciga Ciqaabta Ciidammada Qalabka Sida waa la baab'yey.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelaya marku uu soo saxeexo Jaalle Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanku, waxaan lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawuladda.

Muqdisho, 9 Dicembre 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*  
GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

## BOOGA LABAAD XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 5 Dicembre 1973, L. 119.

Nidaaminta Waqafyada.

### GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO EEGAY Warqaddii Koowaad yo tii Labaad ee Kacaanka iyo Xerka Lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktobar 1969.

ISAGOO EEGAY Qodobka 2aad ee Xerka Lamb. yahay 21 ee soo baxay 19kii Jannayo 1973.

ISAGOO FIIRAYA Inay laagma maarmaan tahay in la soo saaro nidaamooyinka kan ee lagu fulinayo Xeerkha Waqafyada ee Lamb. lahay 21 ee soo baxay 19kii Jannayo 1973.

ISAGOO AQOONSADAY In Xeerkha Waqafyada loo sameeyo Hab idaaari ah (Regolamento Amministrativo) oo lagu maamulo.

ISAGOO QAATAY Ra'yigii Xhogayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Dijinta.

### WUXUU SOO SAARAYAA NIDAAMOOYINKA

#### HOOS KU QORAN

Qodobka 1aad

*Guddiga Waqafyada*

1. Sidii loo ilaalinlahaa oo loo la socon lahaa xoolaha la waqaf waa in la magacaabaa guddi waqafyada loo xil saaro oo ka kooban:

- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta Gudoomeye;
- Agaasimaha Waaxda Diinta — Xubin-Xoghaye;
- Nin Culumada Mashaayikhda ka mid ah oo uu magacaabo;
- Hoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

2. Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta waa inuu la socda wixii uu qabto Guddiga Waqafyada.

Qodobka 2aad

*Mas'uuliyadda Xoolaha Guud ee la Waqafy*

Mas'uuliyadda dhammaan xoolaha guud ee la waqafay oo ay ka mid yihiin Masaajiddada iyo xoolaha la waqfay intaan Xeerkhaan soo bixin oo masu'ul yaddooda ay saarneyd dad kale, waxay saaran tahay Guddiga loo xil saaray waqfyada.

### Qodobka 3aad

#### *Diiwaan gelinta xoolaha guud*

1. Guddigu wuxuu haysanayaa Diiwaanka waqafyada la geliyey oo loo yaqaan «Diiwaanka Waqafyada» kaasoo caddeynaaya waxyaalaha hoose ku qoran:

- i) Meesha ay ku yaalaan xoolaha la waqfay iyo caddeeyntooda.
- ii) Qofka waqfay magaciisa iyo rugta joogtadiisa ah haddii la yaqaan.
- iii) Meesha loogu waqfay magaceeeda haddii la yaqaan.
- iv) Qofka loo dhiibay magaciisa iyo rugta joogtadiisa ah.
- v) War kasta oo kale oo ku saabsan maamulka waqafka.

2. Qof kasta oo loo dhiibay xoolaha la waqfay waa inuu hubsadaa in Diiwaanka la gelyo muddo 3 bilood gudaheeda waqfyada horay u jrey iyo kuwa cusub bil gudeheeda marka la bilaabo taarikhda uu hirgal Xeer Nidaamiyaha kan. Haddii uu sidaas yeeli waayo wuxuu gelayaa dambi waxaana lugu ciqaabi karaa haddii ay Maxkamad ku caddeyso taqsiir ilaa iyo 1.000/-.

### Qodobka 4aad

#### *Guddiga awoodda uu u leeyahay xisaabaadka weydiintooda*

1. Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu u yeero ninkii loo dhiibay xoolaha kasta ee dadweynuhu leeyahay oo la waqfay si uu uga qanciyo in xoolahaa loo maamulay sidii waajibka ahayd. Wuxuu guddigukaloo awood u leeyahay inuu weydiisto ninkii loo dhiibay xoolaha la waqfay ama qofkasta oo kaleba in uu keeno buugag iyo warqadaba ku saabsan xisaabaadka ama kuwa kale ee ku saabsan waqafyadaas.

Qof kasta oo si kas ah u diida weydiiskaas wuxuu gelayaa dambi waxaana lagu ciqaabi karaa haddii ay Maxkamaddu dambiga ku caddeyso taqsiir ilaa iyo 1.000/- Sh.

### Qodobka 5aad

#### *Guddigu awoodda uu u leeyahay ilaalinta xoolaha guud*

#### *ee la waqfay mararka qaarkood*

1. Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu la wareego ilaalinta xoolaha guud ee la waqfay haddii ay u muuqato:

- i) In qofka loo dhiibay waqfka aan si habboon loogu magacaabin.

- ii) Qofka xoolaha la waqfay loo dhiibay haddii aanu si fiican wajibkiisa u gudan, ama gutay si aan loo masaabixin ama si aan xeerku ahayn ama khilaafsan usluubta wanaagsan.
2. Markaasoo kale, Guddigu markey waqtii siiyan oo uu ku sheego sababihii uu uga soo bixi kari waayey shaqadiisii, guddigu wuxuu amar ku soo saa rayaa inuu la wareegey ilaalinta xoolahaas ama ay u dhiibaayaan nin kale.
3. Qof kasta oo raali ka noqon waaya amrkaas wuxuu arji u qoran karaa oo dhibaatadiisa u sheegan karaa Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta Haduusan misna ka raali noqon go'aankii Xoghayahay ama Xoghayahay uusan soo gaarsiin go'aanka muddo 30 maalmood gudaheeda qofku wuxuu u dacwoon karaa Maxkamadda Sare sida Shar-ciga waafaqsan.

#### Qodobka 6aad

*Xoolaha Guud ee la waqfay waa in loo maamulaa  
siduu rabey ninka waqfay*

1. Xoolaha guud ee la waqfay waa in loo maamulaa sida uu rabey ninkii waqfay laankiinse sida uu rabey waa iney noqotaa wax suuragal ah oo waafaqsan Sharciyada iyo danta guud.
2. Mar kasta oo guddigu arko inaan la socodsii kareyn amaba ay sharciga ka hortaagan yahay sida ninkaasi uu rabey, wuxuu Guddigu awood u leeyahay inuu go'aan ka gaaro si loo maamulo x̣olahaas oo laagu qabto hawl fiican sida waafaqsan danaha guud iyo sharciyada.

#### Qodobka 7aad

*Hawsha xisaabaadka iyo Hantidhawrka*

1. Waxaa waajib ku ah Guddiga inuu si fiican u ilaaliyo xisaabaadka ku saabsan xoolaha la waqfay oo uu maamulayo. Xafiiska Hantidhawrka isna waa inuu la socdaa xisaabaadkaas.
2. Lacagta ka timaada xoolaha la waqfay waa in la dhigaa Bangiga Dawladda ayadoo lagu dhigaayo magaca waqafka uu leeyahay Lacaataas.
- Xisaabaadkaas waxaa maamulya Guddiga.

#### Qodobka 8aad

*Kulanyada*

1. Guddigu wuxuu kulmayaa ugu yaraan siddedii billoodba mar. Guddigu waqtiyaal kalana waa kulmi karaa haddii Xighayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta waqtii uu u qabto.

2. Xoghayaha Guddigu wuxuu qorayaad hadallada fadhiyada Guddiga waana saxiixayaa. Guddoomiyaha Guddiguna waa la saxiixayaa.

Qodobka 9aad

*Shaabada Guddiga*

Guddiga waqafyada wuxuu yeelanayaa shaabda u gaar ah oo tilmaameheedu uu caddeynayo Xoghayahay Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

Qodobka 10aad

*Heer nidaamiyahakan hirgalikiisa*

Xeer ndaamiyashakan wuxuu hirgeli doonaa taariikhda uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

-Muqdisho, 5 Dicembre 1973.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*  
GUDDOONSHABA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Tr. 8 Dicembre 1973, L. 120.

Isbadelkii Shanaad ee Miisaaniyadda sannadkan 1973 (5th Virement of 1973 Budget).

**GUDDOONSHAH A  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGA OO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka, iyo Golaha Xoghayoyaasha ee 6-12-1973.

ISAGA OO ARKAY Qodobka 2 ee Xeerka Miisaaniyadda sannadkan 1973 ee summadiisu tahay 3, 18kii December, 1972.

Qodobka 1

Isbaddelkii Shanaad ee dhexe maray Miisaaniyadda sanadka 1973. Wuxu abaandoonaa sida aad ku arkataan waraaqada ku xidhan (as in Annex A).

Qodobka 2

Xeerkaani wuxuu u dhoqan galayaa si degdeg ah, waxaanu ka mid noqon doona Sharciyadda Dowladda Soomaaliyeed, waana in lagu qora faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 8 December, 1973.

*Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre  
Guddoonshaha Sare ee Kacaanka*

*Jaalle Maxamed Yusuf Weyrax  
Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda*

ISBEDDELKII SHANAAD EE MIISAANIYADDA SANNADKA 1973  
5th VIREMENT O F 1973 BUDGET

MADAX HEAD	Madax xige Subhead	TILMAAN DESCRIPTION	Qiyaaas hore Prov. estim.	Isbaddelka Change	Qiyasta cusub New estimate
Madax 1 Cashuurta wax sco saaridda iyo kharashka.	1	Cashuuurta keenidda alaabta . .	.123.000.000	+ 14.338.255	137.338.255
(Taxes on production and expenditure)					
Madax 10 Wasaar. Maaliyada	5.0.0	Deynta (Public debt service) . . .	16.000.000	+ 14.338.255	30.338.255

## XEER WASAARADDA ARRIMAHAD GUDAHA

9 Dicembre 1973, L. 121.

Magacaawgii idaarada guddiga kacaanka Degmada Sheekh qaybtiiisa Wakiil-lada Beesha.

## WASAARADDA ARRIMAHAD GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xaashadii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga labarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 1972 ee lagu maamulo Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeer Guddoomiyaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 49 ee 8dii bisha Febbrayo 1973 ee lagu dhisay Gobollada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO ARKAY in ay tahay lagama maarmaan in la magacaaboo Wakiillda Beesha ee idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Shekh;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Togdgheer;

## WUXUU GOOYBY

Qodobka 1aad

Kabilaabanta taariikhda Xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoosc ku taxanyihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan iddaarada qayta Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Sheekh:

1. — Khadra Aadan Jaamac
2. — Caasha Daariye Samatar
3. — Maxamuud Gahayr Ismaaciil
4. — Sheekh Maxamed Siraad Sheekh Muuse
5. — Maxamed Axmed Caraale
6. — Sheekh Aadan Xasan
7. — Maxamed Aadan Guuleed
8. — Xuseen Xaaji Xasan

Qodobka 2aad

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rsmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9 December 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 124.*

*Mogadiscio, 13 Dicembre 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA**

1 Dicembre 1973, L. 122.

Qiimaha Alaabta lagama maarmaanèha.

**WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA**

MARKII uu arkay go'aanka 1d. iyo kan 2d. Kacaanka 21ka Oktober 1969;

MARKII uu arkay b) Xeerka Lamb. 94 ee 11-5-1972; t) Xeerka Lamb. 64 ee 14-3-1972; j) Xeerka Lamb. 172 iyo x) Xeerka Lamb. 173 oo soo baxeen 4 Noofembar 1972, kuna saabsanayeehascaarta alaabta lagama maarmaanka ah, iyo wixii ka dib laga bedeleyba;

AYADOO la maqlay Guddiga lagala tashanaayey ilaalistasicirka alaabta lagama maarmaanka ah;

**WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDO:**

Qodobka 1

Ascaarta badeecadda Wakaaladda Ganacsiga Ummadda ay kaga gadayo Dawladaha Hoose; ascaarta Dawladaha Hoose ee Gobolladu, Degmooyinku iyo Tuuloyinku ay kaga gadayaan Dukaanlayda, iyo ascaarta Dukaanlaydu ay kaga gadayaan Dadweynaha, waxay noqondoonaan sida aannu u goynay ee hoos ku qoran, laga bilaabo 1da Disembar 1973:

Lr.	Badeecadda	Galka ama Miisa- anka	Qiimaha ay ku gadayo WGU (ENC) Shs. So.	Qiim. ay ku gadayaan Dow. Hoose Shs. So.	Qiim. ay ku gadayaan Dukaanlayda Shs. So.
-----	------------	--------------------------------	--------------------------------------------------	---------------------------------------------------	----------------------------------------------------

**1 BAASTA:**

Cirio	Kg.	6.03	6.14	6.34
Racconto Lusso	»	3.30	3.80	4.00
Saempa	»	2.62	2.90	3.05
Cadi	»	2.26	2.50	2.65
Makarane Rex	»	2.34	2.75	2.90
Makarone Cadi	»	1.91	2.15	2.30

**2 BURKA:**

Burka Caadi	»	2.73	2.86	3.00
-------------	---	------	------	------

**3 BARIISKA:**

Cadi	»	2.48	2.55	2.72
------	---	------	------	------

Lr.	Badeecadda	Galka ama Miisa- anka	Qiimaha ay ku gadayso WGÜ (ENC) Shs. So.	Qiim. ay ku gadayaan Dow. Hoose Shs. So.	Qiim. ay ku gadayaan Dukaanlayda Shs. So.
-----	------------	--------------------------------	---------------------------------------------------	---------------------------------------------------	----------------------------------------------------

4 BUNKA:

Jabra		»	13.32	13.52	14.02
Sharuur		»	5.20	5.29	5.79
Qashir		»	1.72	2.10	2.62
Neskafe	50 gr.	Qasac	3.90	2.10	2.62
»	56 gr.	»	5.10	5.40	6.20
»	112 gr.	»	8.95	10.80	12.40
»	x 24 gr.	»	7.25	8.40	10.40
»	x 200 gr.	»	14.36	16.80	20.80

5 SHAAHA:

Qubane	Kg.	9.65	10.60	12.60
Tea pot 1/4 lbs.	Baako	1.64	2.00	2.20
Tea pot 1/2 lbs.	»	3.05	4.01	4.26
Read leafe	»	0.79	0.90	1.05

6 SONKORTA:

Sonkorta	Q.li	281.25	286.50	300.00
----------	------	--------	--------	--------

7 SALIIDA:

Qumbana	Kg.	7.00	7.13	7.27
Olifka Berio 1 kg.	Qasac	10.78	11.50	12.00
Olifka Berio 1/2 kg.	»	6.12	6.30	6.70
Olifka Sasso 1 kg.	»	11.62	12.50	13.00
Olifka Sasso 1/2 kg.	»	5.88	6.25	6.75

8 SAABUUN QUBEYS:

Green leaf	Xabo	1.02	1.10	1.20
Yu hwa Large	»	1.40	1.85	2.00
Yu hwa Small	»	0.93	1.00	1.10
Sea gull	»	0.85	1.00	1.10
Mei yu	»	0.98	1.10	1.20
Bee iyo flower	»	0.91	1.00	1.10
Sin hwa	»	1.02	1.10	1.20
Health Medikated	»	0.89	1.10	1.20
Plum Blossom	»	0.90	1.00	1.10
Zohra iyo Sisters	»	0.48	0.50	0.60
Lily	»	0.89	1.00	1.10
Bouget - Portout	»	0.92	1.00	1.10

Lr.	Badeecadda	Galka ama Miisa- anka	Qiimaha ay ku gadayso WGU (ENC) Shs. So.	Qiim. ay ku gadayaan Dow. Hoose Shs. So.	Qiim. ay ku gadayaan Dukaanlayda Shs. So.
	Saabuun Dhar Snow Flakes	»	0.46	0.50	0.60
	Saabuun Budada « Fan »	Qasac	2.35	2.50	3.00
9	DACAS:				
	« V » 6 — 8 <sup>1</sup> / <sub>2</sub>	Joog	2.14	2.50	3.00
	« V » 9 — 11 <sup>1</sup> / <sub>2</sub>	»	2.65	3.00	3.50
	« X » 9 — 10 <sup>1</sup> / <sub>2</sub>	»	2.88	3.50	4.00
	« T » 9 — 10 <sup>1</sup> / <sub>2</sub>	»	3.40	3.70	4.70
10	BATTERIYA:				
	Swan Large Size	Xabo	0.67	0.75	0.85
	Swan Medium Size	»	0.54	0.65	0.75
	Swan Small Size	»	0.39	0.50	0.60
	Tiger 555 Large Size	»	0.66	0.75	0.85
	Tiger 555 Med. Size	»	0.52	0.65	0.75
	Tiger 555 Small Size	»	0.38	0.50	0.60
	Shaminto	Q.li	57.50	—	—

Qodobka 2

Keerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah; wuu-xuuna tirayaa Xeer kastoo ka soo horjeeda.

Waxaa lagu amrayaa qof waliba in uu dhawro, dadka kalent dhoorsiiyo xeerkaan isaga ah.

Muqdishu, 1da Disembar 1973.

XOGHAYAHA DAWLADDA  
*Axmed Maxamed Maxamud*

XEER TALIYAH BANCA NAZIONALE SOMALA

18 Settembre 1973, L. 123.

Xeerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

Xeer Lambar 44 ee 18-9-1973

TALIYAH IYO MAAMULAH GUUD EE

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKAY ARKEEN Qobolka 10aad, Amarka Lr. 12 ee 26kii Se-teembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka 11 degsan Daadhiinta Ganacsiga Dibedda, ee awood

siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, inuu caddeeyo marwalba qii-maha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO OGSOON Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha ad-duunka, sbeddelaaddii qimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka, ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Ban-kiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO ARKAY Go'aanka degdegtah Lr. 129 ee 18-9-1973, ay qaateen Guddiga Maamulka la'aantiis, ayagoo u cuskanaya qodobka Lr. 12 Xubintiisa 4aad Amarka Lr. 6 ee 19kii Oktoobar 1968, laguna bed-delay Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar, 1968.

### WAXAY GOOYEEN

Qodobka 1aad

Xeerka sarrifka lacagaha qalaad ee lagu caddeeyey kuwa Lr. 5 ee 13 Maarsa 1967, rL. 8 ee 28 Nofembar, 1967, Lr. 13 ee 19 Luulyo 1969, Lr. 18 ee 27 Oktoobar 1969, Lr. 21 ee 11 Maajo 1971, Lr. 22 ee 19 Maajo 1971, Lr. 24 ee 27 Agosto 1971, Lr. 27 ee 22 Diseembar 1971, Lr. 29 ee 9 Jannaayo 1972, Lr. 32 ee 4 Luulyo 1972, Lr. 34 ee 27 No-feembar 1972, Lr. 35 ee 6 Febbraayo 1973, Lr. 37 ee 24 Febbraayo 1973, Lr. 39 ee 6 Maarsa 1973, Lr. 40 ee 19 Maarsa 1973, Lr. 41 ee 17 Abril 1973, Lr. 42 ee 16 Luulyo 1973 iyo Lr. 43 ee 6-8-1973, waxaa loo bed-delay sida hoos ku qoran, marka laga bilaabo 18ka Seteembar 1973.

LACAGAHA QALAAD	IIBSASHADA OO SHILIN AH	GADIDDA OO SHILIN AH
US \$	1	6.1704
UK £	1	14.8001
LIT.	91,57	1.0000
LIT.	89,77	—
D. M.	1	2.5395
F. F.	1	1.4876
B. F.	1	0.1698
D. F.	1	0.0380
I. R.	1	0.8325
SW. F.	1	2.1385
K. SH.	1	0.8982
K. SH.	1	0.8982
T. SH.	1	0.8982
U. SH.	1	0.8982

Xeerkan waxaa lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jam-huriyadda Dimuqradiiga Soomaaliyeed, wuxuuna hirgeli doonaa 18-9-1973.

Muqdisho, 18-9-1973.

CUMAR AXMED CUMAR  
Maamulaha Guud

CABDIRAXMAAN N. XIRSI  
Taliyaha

XEER TALIYAH A BANCA NAZIONALE SOMALA

26 Novembre 1973, L. 124.

Xeerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

(LTD. & D.M.)

Xeer Lambar 46 ee 26-11-1973

TALIYAH A KU-MEEL GAARKA AH  
BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKU ARKAY Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar, 1968, ee awood buuxda siinaya Maamulaha Guud markuu maqan yahay Taliyaha.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Amarka Lr. 12 ee 26kii Seetembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed inuu caddeyo marwalba qiimaha iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO OGSOON Dhawaan ciirciisigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka, ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTA In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO ARKAY Go'aanka degdegta h Lr. 131 ee 26-11-1973, uu ku qaatay Taliyaha iyo Guiddiga Maamulka la'aantood, asagoo u cuskanaya qodobbada 12 iyo 13 Xubntooda 4aad Sharga Lr. 27 ee 26kii Nofeembar, 1968.

WUXUU GOOHEY  
Qodobka 1aad

Xeerka sarrifka lacagaha qalaad (LTD & D. M.) ee lagu caddeeyey kuwa Lr. 5 ee 13 Maars 1976, Lr. 8 ee 27 Nofeembar 1976, Lr. 13 ee 19 Luulyo 1969, Lr. 18 ee 27 Oktoobar 1969, Lr. 21 ee 11 Maajo 1971, Lr. 22 ee 19 Maajo 1971, Lr. 24 ee 27 Agoosto 1971, Lr. 27 ee 22 Disseembar 1971, Lr. 29 ee 9 Jannaayo 1972, Lr. 32 ee 4 Luulyo 1972, Lr. 34 ee 27 Nofeembar 1972, Lr. 35 ee 6 Febbraayo 1973, Lr. 37 ee 24 Febbraayo 1973, Lr. 39 ee 6 Maars 1973, Lr. 40 ee 19 Maars 1973, Lr. 41 ee 17 Abril 1973, Lr. 42 ee 16 Luulyo 1973, Lr. 43 ee 6 Agoosto 1973 iyo Lr. 44 ee 18-9-1973, waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran. marka lacaa hilaabo 26-11-1973.

LACAGAHA QALAAD	IIBSASHADA OO SHILIN AH	GADIDDA OO SHILIN AH
LIT. 93,86	1.0000	—
LIT. 92,01	—	1.0000
D. M. 1	2.3617	2.4090

Xeerkaan waxaa lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliyeed, wuxuuna hirgeli doonaa 26-11-1973.

Muqdisho, 26-11-1973.

CUMAR AXMED CUMAR  
*Kumeel Gaar Taliye*

**BOGGA SEDDEXAAD**  
**TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH**

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**N A A D A      D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Jaamac Biixi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 22-11-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodon Ji. 26 Ju., oo leh qiyas Rettangolare; kuna fadhiya  $40 \times 40 = 1600$  mdh.

Soohdin: Waqooyi Waado; Koofur Waado; Galbeed Waddada 26 Juyo; Bari Dhul ah lambarkiisu 13 iyo 19.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 4 Dicembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A P H U L

Waxaa la caddeynaya in Jaalle Muuse Ciise Moxamed, u usoo qortay arji qybtu Dhismaha iyo Dhulka 4-11-1973, uu ku weydaasanayey dhul dhismo dowlaadeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wamberi, oo leh qiyas Rettangolare, kuna fadhiya  $12,80 \times 12 = 153,60$  mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Faduma Cabduraxmaan; Galbeed Moxamed Moxamuud: Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga dooddi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Mugdisho, 1 Dicembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A P H U L

Waxaa la caddeynaya in Jaalle Moxamed Cali Nuur «Dacar», u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-4-1967, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan (26 Junyo), oo leh qiyaas Fidsasho «L», kuna fadhiya 30; 3x27; 3 = 171 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Xaashi Ibrahim Nuur; Galbeed Xasan Axmed iyo Cali Quurshe; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaypta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Mugdisho, 10 Dicembre 1973.

# Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka *Muamalat Sabdi Saciid*

## **WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

NAAADA PHULL

Waxaa la caddeynaya in Jaalle Cabdullahi Xasan Foodey, u usoo qartay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 11-10-1973, uu ku weydiisana-yeey dhul dhismo dowladeed kuno yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadag, oo leh qiyaas  $27 \times 13.50$  Rettangolo, kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdiin: Waqooyi Moxamed Enow; Koofur Jid; Galbxid Jid; Bari Jid.

Qofkiid dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 10 Dicembre 1973.

**Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka**  
*Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamed Nuur Guutale, kuna yaal Muqdisho, Xafadda 7° Km. Jidka Afgooyey-X — T.G. N. 640-65.*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda 7° Km. Jidka Afgoye - Xamar, kuna fadhiya 5.000 mdh., waxaa la caddeynaya in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 931140 ee 20-3-1966, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas Rektangular, oo ku fadhiya  $30 \times 20 = 600$  mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqqooyi Waddada 21ka Oktobar; Koofur Gabal Dhul ah Lambar-kisuma 297; Galbeed Gabal Dhul ah Lambarkisuma 290; Bari Waddo.

**Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka**  
*Mavamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamed Nuur Guutale, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Hodan — T.G. N. 572-65.*

Jaallaha kor magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda Hodan, kuna fadhiya  $60 \times 60 = 3.600$  mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 598337 ee 11-11-1965, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyas Rettangolare, oo ku fadhiya  $60 \times 40 = 2.400$  mdh., soohdin waxuu a leeyahay;

Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbeed Dhul Lambarkiisu ah 351 iyo 343; Bari Jid.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
(224) *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Abdulqaadir Moxamed Nuur Gutale, kuna yaal Muqdisho, Xafadda 7° Km. Jidka Afgoye Ham.*

— T.G. N. 639-65.

Jaallaha kcr ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda 7° Km. Jidka Afgoyey - Hamar, kuna fadhiya 5000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hode ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 930272 ee 26-1-1966, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyas Rektangular, oo ku fadhiya 600 mdh., soohdin waxuu la leeyhay;

Waqooyi G. dhul ah Lambar 286; Koofur Wadde; Galbeed Wadde; Bari G. dhul ah Lam. 293.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

**MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE**

**WAXAA AKHRIIYEEY DACWADDAN**

MARKAAN ARKAY waxay ku saabsantahay ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Somalida Laanta Kismayo; ee aan ogaaday inay tahay Shaqada Xafiiskan, markaan arkay Qoddobka 69 ee Xeerka tiradiisu tahay 2 ee 9-9-1965;

WAXAAN CADDEYNAYAA DUMIDA BUUGA L. 1655 Shs. So. 800/- (Sideed boqol oo shilin).

WAXAAN AMRAYAA in loo cusbooneysiyo Maxamed Weyrax Maxamed muddo 15 (shaniyotoban beri) ah oo laga bilaabo markii lagu soo dhigo Bulletinka haddaan la helin qof kale oo buuga sheegta.

Waxaan 'kaloo' la caddeeynayaa in buuga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismayo, 18kii Nofembar 1973.

Kusime Guddoomiyaha  
Maxkamadda Gobolka J. Hoose  
*Dr. Axmed Ibrahim Moxamed*

(226)

**MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE**

**WAXAA AKHRIIYEEY DACWADDAN**

MARKAAN ARKAY waxay ku saabsantahay ogeysiiskii Bankiga Kaydka iyo ammahda laanta Kisimayo; oo aan ogaaday in ay tahay shaqada Xafiiskan, markan arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan caddeeynayaa dumid Bugga L. 3307 Shs. 450/- (afarboqooliyokonton) Shs.

Waxaan amraya in loo cusbooneysiyo Warsame Aden Moxamed muddo 15 (shaniyotobanberi) ah laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah, haddan la helin qof kale oo bugga sheegta.

Waxaa kalo la caddeeynayaa in bugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

Kisimayo, 5 Dishembre 1973.

Kusime Guddoomiyaha  
Maxkamadda Gobolka J. Hoose  
*Dr. Axmed Ibrahim Moxamed*

(227)

**MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR**

---

**WAXAAN AHKRISATAY DACWADDAN**

MARKAAN ARKAY waxay ku Saabsantahay okeysiiski Bankiga Keydiska iyo ammaada Soomaalieed Waxaa ogAADAY iney ku tirsantahay Shaqada Xafiiskan;

Oo aan arkty qodobka 69 D. L. 9-965 N. 2;

Waxaan Cadeynayaa dhumida Buugga Lam. Yahay 4734, ay ku taal Sh. So. 100/- (boqol Shilin) Waxaan amrayaa in loo sameeyo Buugga Maxamed Samatar Faarax Muddo 30 Maalmood ah oo ay ka bilaabato Maalinta lagu Shaaciyo Bolitiino Uffijaalo; haddan la helin qof kale oo Buugga sheegto.

Waxaan kaloo la Codsanayaa in Buugga gacanta ~~Lega~~ saaro Ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita Wakaalad aan Shaki ku jirin, iyadoo la Sugaayo 30 Kaas beri oo kor ku qoran.

Muqdisho, 15-12-1973.

GARSOORE

(228)

*Dr. Cabdirasaaq Geelle*

---

**MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR**

---

**WAXAAN AHKRISATAY DACWADDAN**

Markaan arkay waxay ku saabsantahay ogeysiiska Bankiga keyda iyo danta waxaan ogAADAY iney ku tirsan tahay shaqada xafiskaan;

Oo aan arkty qodobaka 69 D. L. 9-9-65 N. 2;

Waxaan cadeynayaa dhumida buuga lam. 9510 oo ay ku jirto lacagta tiradeedu tahay Shs. So. 2.200/- Waxaan amryaa in loo sameeyo buugaas Cabdullahi Yaasin Cusmaan mudo 30 maalmood ah oo ay ku bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale, haddan la helin qofkale oo buga sheegtah.

Waxaa kaloo la codsanaya in buuga gacante laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita wakaalad aan shaki ku jirin, iyadoo la sugayo 30 kaas beri oo kor ku qoran.

Muqdisho, 15-12-1973.

GUDDOOMIYAH M. X.

(229)

*Dr. Cabdirisaaq Geelle*